



BAAQ

Hordhac

Ururro ka tirsan Dallada Bulshada rayid ka ah ee PUNSAA ayaa maanta oo taariikhdu tahay 26/02/2019 shir isugu yimid xafiiska dalladda PUNSAA waxayna aad uga doodeen dhacdooyinka foosha xun oo la xariira tacadiyada ka dhanka ah haweenka ayna ugu dambaysey dhacdadii foosha xumayd ee ka dhacday Gaalkacyo 25/02/2019 lagulana kacay marxuumaddi da'da yarayd ee **Caisha Ilyaas Aadan**, waxayna xubnaha dalladdu aad u cambaaraynayaan dhacdadaas aadka u xun, iyadoo walaac ka muujiyey baaqna kasoo saaray sababaha ay usoo noqnoqanayaan dhacdooyinka foosha xumi iyo sida aan wax looga qabanayn.

Dhibaataada dhacday

Waxyaaaha keenay inay soo noqnoqdaan dhacdooyinkan foosha xumi waxaa qayb ka ah:

1. Waxaa horseed u ah dhibaatooyinkii horay u dhacay oo aan waxba laga qaban
2. Odayaasha dhaqanka oo ku dhagan markasta Xeer jajab in arrinta lagu xalliyo
3. Dawladda oo aan fulinayn sharciga u degsan arrintan

Sida looga gudbi karo dhibaatooyinkan

1. In laga madaxbaneeyo odayaasha dhacdooyinka la xariira tacadiyada ka dhanka ah haweenka
2. Waa in ay dawladdu fulisaa tilaabo adagna ka qaadaa cid kastoo ku xadgudubta sharafta iyo xuquuqda dumarka
3. Hay'adaha amniga iyo garsoorka waa inay fuliyaan waajibaadkooda ku aaddan ilaalinta iyo fulinta sharciga
4. Waa in aysan waalidku garabsiin wiilashooda iyo cidkastoo kul ugeyelata dhibaatan ayna la shaqeeyaan laamaha amniga si looga gudbo dhacdooyinkan foosha xun ee soo noqnoqanaya

Gabagabo

bulshada rayidka waxay ku baaqaysaa

- 1) in wacyigalin laga sameeyo dhamaan deegaanada puntland sida goobaha waxbarashada,masaajidyada iyo meelaha kale ee bulshadu ku kulanto
- 2) odayaal dhaqameedku waa inaysan garabsiin farahana kala baxaan dhacdooyinka la xiriira tacadiyada ka dhanka ah dumarka.
- 3) Waa in ay Culimada puntland ka qaataan kaalintooda kaga aaddan dhacdooyinkan la xiriira tacayida loo gaysanayo dumarka .
- 4) Waa in dawladda puntland ay fulisaa sharciga uyaala kufsiga iyadoo lagu salaynayo waxa sharciga islaamka uu ka qabo

Dhammaad

Gudoomiyaha Dallada PUNSAA

Faysal Axmad Warsame

Faysal Axmad Warsame

